METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

HELITAANKA & AQBALITAANKA BUUGA ARDAYGA - WAALIDKA 2020-2021

Waan fahansanahay in Buuga Ardayga iyo Waalidka MNPS ee 2020-2021 laga heli karo shabakada *www.mnps.org/handbook*. Saxeexa hoose wuxuu qirayaa inaan akhriyey oo aan fahmay buuga iyo shuruucda ku taxaluqda.

Magaca Ardayga *(fadlan qor)*: _____

Magaca Iskuulka *(fadlan qor)*: _____

Magaca Waalidka ama Masuulka *(fadlan qor)*: _____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

XUSUUSNOW: Haddii aadan saxeexin oo aadan ku soo celin foomkan iskuulka kama reebayso masuuliyada ardayga ka saaran inuu u hoggaansamo shuruucda iyo qawaaniinta lagu xusay Buuga Ardayga - Waalidka MNPS.

GOO-GOYNTA & XAADIRITAANKA ISKUULKA

Waan fahamay in ilmahayga lala tiigsan karo shuruucda xaadirida iskuullada waajibka ah haddii ilmahaygu uu si sharci daro uga maqnaa iskuulka ama uu caadaystey goo-goyn, iyo in hawlwadeenada dhaqangeliya sharcigu si ku meel gaar ah ula wareegi karaan masuuliyda ilmahayga si ay u geeyaan Xarunta Xaadirida Ardayda ee Metro (MSAC). (Faahfaahin kale eeg *www.mnps.org/attendance*.)

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

MACLUUMAADKA DIIWAANKA FERPA FOOMKA TANAASULKA

Magaca Ardayga *(Qor)*: _____

Aqoonsiga Ardayga: _____

OGEYSIISKA MACLUUMAADKA DIIWAANKA TANAASULKA:

Iyadoo la tixraacayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada iyo Dhawritaanka Arimaha Dahsoon Federaalka ee 1974 (FERPA), maadaama wax laga bedeley, diiwaanada waxbarashada ardayga waxaa loo maareeyaa inay qarsoodi yihiin, marka laga reebo duruufo khaasa oo kooban oo lagu xusay sharcigaas, looma gudbin doono cid kale iyadoon oggolaansho laga helin waalidka/masuulka ama ardayga (haddii ardaygu jiro 18 sano ama ka weyn). Arintu si kastaba ha noqotee, sharcigu wuxuu iskuullada u ogolaadaa inay bixiyaan "macluumaad diiwaanka" ardayga iyagoon waalidka/masuulka ama ardayga ka helin oggolaansho. Haddii **AADAN** rabin in la bixiyo qaar ka mid ah macluumaadka ku jira diiwaanka iyadoon oggolaansho lagaa haysan, waxaad dooran kartaa inaad "ka tanaasushid" in arintan laga reebo FERPA oo saxeex foomka hoose. Macluumaadka ku jira diiwaanka ardayga ka tanaasuley in la bixiyo macluumaadka, sida ku cad sharcigan/nidaamkan loogu talagalay tanaasulka, waxay ku sii calaamadsanaan doonaan iskuulka uu hadda dhigto, ilaa waalidka/masuulka ama ardaygu codsado in laga saaro calaamadaas haddii ay buuxiyaan oo soo gudbiyaan ka noqoshada tanaasulka soona gaarsiiyaan iskuulka ama Xarunta Macluumaadka Qoyska MNPS.

Anigoo ah _____ *(waalidka/masuulka ama ardayga magaciisu kor ku xusan yahay*)*, waxaan codsanayaa diidmada macluumaadka soo socda ee lagu aqoonsan karo qofka ee ku jira Diiwaanka Macluumaadka sida ku cad FERPA:

- Magaca Ardayga
- Cinwaanka
- Sawirada
- Taariikhda iyo goobta dhalashada
- Maadada takhasuska waxbarashada
- Taariikhda la xaadiray
- Ciyaaraha iyo hawlaha rasmiga ah ee la ogolaaday inaan ka qaybgalo
- Miisaanka iyo dhererka ciyaartoyda ku jira naadiyada isboortiga
- Shahaadooyinka, maamuusida, iyo abaalmarimaha aan helo
- Hey'ada waxbarashada ama macadka ugu danbeeyey la dhigto

Waxaan fahansanahay in marka la gudbiyo foomkan, macluumaadka kor ku xusan aan loo gudbin karin cid kale iyadoon oggolaansho la iga haysan ama haddii aan iskuulka sharci ahaan looga baahnayn ama sharcigu u ogol yahay sida ku cad FERPA in la bixiyo macluumaadkan iyadoon oggolaansho la iga helin; iyo in macluumaadka ku jira diiwaanka aan la bixin doonin laga soo bilaabo waqtiga iskuulku helo foomkan ilaa inta codsigayga tanaasulka laga nasakhayo. Waxaan fahansanahay in ay dhici karto inaannan ka tanaasulin adeegsiga lambarka aqoonsiga ardayga sababtoo ah waa muhiim in la aqoonsadno macluumaadka loogu talagalay iskuulka. Sidoo kale waxaan fahansanahay in haddii la bixiyo macluumaadka ku jiro diiwaanka ha hor inta aan iskuulku helin codsiga tanaasulka, ay dhici karto inaan iskuulku joojin karin soo bandhiga macluumaadka ku jira diiwaankayga. Waxaan fahansanahay inay dhici karto inaan codsado oo aan hor istaago in macluumaadka ku jirta diiwaankayga/ilmahayga la adeegsado haddii aan iskuulka la xiriiro.

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

Saxeexa Ardayga* _____ **Taariikhda** _____

**Haddii aad ka yar tahay 18, waalidka ama masuulku waa inuu ardayga u saxeexaa foomka tanaasulka.*

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

LAANTA CAAFIMAADKA SHACABKA DEGMADA XOG-URURINTA DHAQAMADA HALISTA AH EE DA'YARTA 2021
FOOMKA TANAASULKA

KELIYA BUUXI FOOMKAN HADDII AADAN U OGGOLAYN IN ILMAHAAGU KA QAYBGALO XOG-URURINTAN.

Gudoonkeenu wuxuu ka qaybgelayaa Xog-ururinta Dhaqamada Halista ee Da'yarta Dugsiga Sare ee Davidson County inta lagu jiro 2021 (YRBS). Xog-ururintan waxaa maalgeliyey oo maareeya Laanta Caafimaadka Dadweynaha Degmada. Xog-ururinta waxaa waxyaabo ku saabsan caafimaadka laga weydiiyaa ardayda ku jira fasallada 9aad ilaa 12aad, sida adeegsiga cuntada nafaqada leh, denbiyada arxan darada ah, dhaqdhaqaaqa jidhka, dhaawacyada, tubaakada, khamriga, adeegsiga maandooriyeyaasha kale, iyo waayaha adag ee caruurnimada la soo dersa. Sidoo kale waxaa wax laga weydiin doonaa dhaqamada galmada ee horseeda uurka iyo cudurada galmada la isku qaadsiiyo sid HIV.

Ardayda ku jira dugsiga sare waxaa la weydiin doonaa inay dhammaystiraan YRBS, waxay ku qaadan doontaa inay dhammaystiraan qiyaastii 30 daqiiqo. Ka qaybgalka xog-ururintan wax dhib ah u keeni mayso ilmahaaga ama way xiddidnaanaysaa. Dhibta keliya ee ka iman kartaa waa in ardayda qaarkood su'aallaha qayb ka mid ah u arkaan su'aallo xaasaasiya. Xog-ururinta waxaa loo qorsheeyey si loo ilaaliyo arimaha dahsoon ee ilmahaaga. Ardaydu magacyadoodu ama macluumaadka kale ee lagu aqoonsado xog-ururinta kuma dul qori doonaan. Sidoo kale, ma dhici doonto in magac arday ama iskuulku lagu xuso natiijooyinka warbixinta la soo gudbiyo. Ilmahaagu faa'iido isla markiiba ka heli maayo haddii uu ka qaybgalo xog-ururinta, inkastoo ay dhici karto in natiijada xog-ururinta ay ilmahaaga ama caruurta kale mustaqbalka caawiso. Waxaanu jecelnahay in dhammaan ardayda la doortay ka qaybgalaan xog-ururinta, balse xog-ururintu khasab ma aha. Ma jirto wax talaabo ah oo laga qaadayo iskuulka, adiga ama ilmahaaga haddii aan ilmahaagu ka qaybgelin xog-ururinta. Ardaydu way ka boodi karaan su'aal kasta oo aysan rabin inay ka jawaabaan. Waxaa intaas dheer, ardaydu waxay joojin karaan xog-ururinta meel kasta iyagoo aan la kulmayn wax ganaaxa. Haddii aad rabtid inaad aragtid xog-ururinta, waxaad nuqul ka heli kartaa xafiiska guud ee iskuulka ilmahaagu dhigto iyo shabakada *https://www.cdc.gov/healthyyouth/data/yrbs/questionnaires.htm*. Sidoo kale waxaa nuqul laga heli karaa Xarunta Gudoonka Waxbarashada ee ku taal 2601 Bransford Avenue, Nashville, TN 37204.

Waxaad ka tanaasuli kartaa in ilmahaagu ka qaybgalo xog-ururinta haddii aad wacdidi 615-340-8608 ama email u dirtid YRBSInfo@nashville.gov. ama waxaad buuxin kartaa qaybta hoose kadibna waxaad ku soo celin kartaa foomkan oo saxeexan oo taariikhaysan Laanta Caafimaadka Dadweynaha Degmada inta ka horraysa 30ka Janaayo, 2021. **Keliya samee arintan haddii aadan** rabin in ilmahaagu ka qaybgalo xog-ururinta. Haddii aad qabtid su'aallo kale oo ku saabsan xog-ururinta oo macallinka ilmahaaga ama maamuluhu aanu ka jawaabi karin, fadlan wac: 615-340-8608.

*Fadlan foomka qaybtan buuxi **keliya haddii aadan rabin** in ilmahaagu ka qaybgalo xog-ururinta, oo ku soo celi boosta adigoo ku soo hagaajinaya: Latissa Hall, Maareeyaha - Barnaamijyada Da'yarta Laanta Caafimaadka Dadweynaha Degmada, 2500 Charlotte Avenue, Nashville, TN 37209.*

☐ **MAYA, ilmahayga waxaa dhici karta inaysan** xog-ururintan ka qaybgelin.

Magaca Ardayga oo sadexan: _____

Fasalka Ardayga _____Magaca Iskuulka: _____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

XAALADDA CIIDANKA EE WAALIDIINTA IYO MASUULKA SHARCIGA AH

BUUXI FOOMKAN HADDII AA TAHAY WAALID AMA AAD MASUULKA ARDAYGA OO AAD HADDA KA TIRSAN TAHAY CIIDANKA.

Wakiilada sharci-dejiyeyaalka heer gobal iyo heer federaalba waxay isku dayaan inay gudoonada waxbarashada ka caawiyaan sidii ay u qiimayn lahaayeen kaalinta waxbarashada ay kaga jiraan ardayda ay waalidkoodu ama qofka sharci ahaan ka musuul ahi ku jiro ciidamada si ay aqoon fiican ugu yeeshaan xiriirka u dhexeeya nolosha ciidanka iyo barbaaritaanka ilmaha. Wakiilada sharci-dejiyeyaasha gobalku waxay gudoonada uga baahan yihiin inay aqoonsadaan ardayda waalidkood ama qofka sharci ahaan masuulka ka ahi ciidanka ku jiro. Xeerka Arday Walba Guulaysta wuxuu dhigayaa in ardayda waalidkood ama qofka sharci ahaan masuulka ka ahi gudanayo waajibaadka ciidamada yahay qayb-hoosaad loogu talagalay in warbixin laga soo gudbiyo. Ardayda la aqoonsado ee waalidkoodu ama qofka sharci ahaan masuulka ka ahi soo hoos galo sadexda qaybood ee ciidamadu u qaybsamaan:

4 - Active Duty Military – Waalid ama masuul gudanaya shaqada Difaaca Dalka ama Keydka Ilaalinta Qaranka (shaqaale rigli ah, ciidamada kaydka) ama xubin joogto ka ah qayb ka mid ah Ciidamada Qalabka Sida.

5 - National Guard Military –Waalid ama masuul si aan rigli ahayn uga qaybgala Ilaalinta Dalka.

6 - Reserve Military – Waalid ama masuul si aan rigli ahayn uga qaybgala ciidamada qalabka sida ee kaydka ah.

Qaybahan waxaa loogu talagalay waalidiinta ama masuuliyiinta sharciga ah ee ardayda oo keliya, looguma talagelin ardayda ka diiwaangashan ciidamada. ***Si loo uruuriyo xogta iyadoo ujeedadu tahay in la soo gudbiyo, waa in arday walba oo dhigta iskuullada dawladda degmada Nashville dhammaystiro Xog-ururinta Cilaaqaadka Ciidanka qoyska sidoo kalena waa in arday walbaa ku soo celiyo iskuulka uu dhigto.***

Faahfaahin kale oo ku saabsan ballan-qaadka Wasaaradda Waxbarashada Maraykanka iyo adeegyada loogu talagalay qoysaska ciidamada:
https://www.ed.gov/veterans-and-military-families

XOG-URURINTA CIIDANKA

Magaca Iskuulka: _____ Fasalka: _____

Ardayga #: _____ Magaca Ardayga: _____ Taariikhda Dhalashada: _____

Macluumaadka waalidka/masuulka ardayga iyo macluumaadka masuulka ku jira diiwaanka ardayga MNPS waa inay isku mid yihiin.

MAGACA WAALIDKA AMA MASUULKA SHARCIGA AH	WAQTIGA AAD BILAWDAY SHAQADA AAD XILIGAN CIIDAMADA KA HAYSID	QAYBAHA: *4 (Active Duty), 5 (National Guard) ama 6 (Reserve)*	QAYBTA: *Ciidanka Xooga, Ciidanka Bada, Ciidanka Cirka, Marine Corps, ama Ciidanka Ilaalinta Xeebaha*

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

MACLUUMAADKA KA-TANAASULKA XOG-URURINTA MNPS IYO FOOMKA OGGOLAANSHAHA DADBAN

KELIYA BUUXI FOOMKAN HADDII AADAN U OGGOLAYN IN ILMAHAAGU KA QAYBGALO XOG-URURINTA AY FULISO MNPS INTA LAGU JIRO 2020-2021.

Haddii aad dooratid inaad ka tanaasushid, ku soo celi foomka aad saxeexday iskuulka ilmahaaga.

Inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-2021, MNPS waxay samayn doonaan labo ilaa sadex xog-ururineed oo qaadan doonta (10-20 daqiiqo) waxaana loogu talagalay ardayda ku jira fasalka sadexaad iyo fasallada ka sareeya. Xog-ururintaas waxay naga caawin doonaa inaan aqoon fiican u yeelano ardaydeena iyo aragtida ay ka qabaan iskuulladooda. Khasab ma aha in ilmahaaga xog-ururinta ka qaybgalo. Ilmahaaga waad ka reebi kartaa inuu ka qaybgalo xog-ururinta inta ka horeysa inta aan xog-ururinta la siinin. Waxaas intaas dheer, ilmahaagu wuxuu dooran karaa inuu ka qaybgalo xog-ururinta iyo in kale ama wuxuu ka jawaabi karaa su'aallaha uu rabo. Ganaax MA JIRO haddii adiga ama ilmahaagu aad door bidaan inaydan ka qaybgelin.

Xog-ururinta Jawiga Iskuulka
Ujeeddada xog-ururinta jawiga iskuulku waa si ay noogu fududaato horumarinta jawiga iyo dhaqanka iskuulka. Xog-ururinta waxaa ilmahaaga lagu weydiin soonaa dareenka ay ka qabaan iskuulka sida xiriirka ay la leeyihiin macallimiinta, sida ay ugu xiran yihiin iskuulka, aragtida ay ka qabaan ammaanka, iyo guud ahaanba jawiga iskuulka. Ilmahaaga wax dhibaato ah ka soo gaari mayso haddii uu ka qaybgalo xog-ururinta.

Xog-ururinta Badhaadhaha iyo Xaafadaha
Ujeeddada Xog-ururinta Xaafada iyo Badhaadhaha waa in aqoon fiican loo yeesho dareenka ardayda marka ayna iskuulka joogin si loo xoojiyo badhaadhaha ardayga. Xog-ururinta waxaa ilmahaaga lagu weydiin doonaa dareenka ay ka qabaan xaafadooda, asxaabtooda, iyo koritaankooda dhinacyada shucuurta iyo la dhaqanka bulshada. Ilmahaaga wax dhibaato ah ka soo gaari mayso haddii uu ka qaybgalo xog-ururinta.

Xog-ururintan waxaa shabakad ammaana ku qaadi doona Panorama Education. Jawaabaha ilmahaaga waxaa lagu lamaanin doonaa lambarka aqoonsiga ardayga waxaana si dahsoon oo ammaan ah u hayn doona xafiiska cilmi baarista MNPS Panorama Education. Inkasoon aysan ku jirn su'aallaha xog-ururinta, haddii ardaygu soo gudbiyo inuu nafsadiisa, dadka kale waxyeelo gaarsiiyo, ama qof kale waxyeelo gaarsiiyo xogtu qarsoodi ma noqonayso sababtoo ah in laga difaaco ardayda ama dadka kale waxyeelada. Shuruucda Arimaha Qarsoon ee Panorama Education waxaa laga heli karaa shabakada *www.panoramaed.com/privacy*.

MNPS waxay natiijooyinka xog-ururinta la wadaagi doontaa iskuulo koox-koox la isu raaciyey iyadoon la magac-dhabayn macluumaadka iskuulka iyo hawlwadeenada gudoonka, sidoo kale waxaa dhici karta in xogta guud dadweynaha loo soo bandhigo. Waxaa laga yaabaa in MNPS siiso jawaabaha xog-ururin gaar ah iyagoon carab-baabeyn macluumaadka cilmi-baarayaal ka baxsan MNPS. Xogta lagu uruuriyo hannaanka qarinta aqoonsiga qofka waxaa dhici karta in lagu kaydiyo Inter-University Consortium for Political and Social Research (ICPSR), maadaama ay qayb ka tahay Daraasaadka Ammaanka iyo Badhaadhaha Da'yarta (Nashville Longitudinal Study of Youth Safety and Well-being).

Waxaa laguu soo diri doonaa teleefan lagugu wargelinayo ka hor intaan la qaadin xog-ururin kasta. Waxaad heli doontaa fursad aad xog-ururin kasta ugu muraajacaysid online-ka ama iskuulka ilmahaaga intaan la bilaabin xog-ururinta.

Haddii aad dooratid inaad ka tanaasushid, fadlan soo buuxi oo saxeex foomka ku lifaaqan bogga danbe.

MACLUUMAADKA KA-TANAASULKA XOG-URURINTA MNPS IYO FOOMKA OGGOLAANSHAHA DADBAN

Haddii aad rabtid sababtu waxay doonto ha noqotee inaan ilmahaagu ka qaybgelin xog-ururimaha MNPS, fadlan calaamadi sanduuqa hoose, soo buuxi foomka oo soo saxeex kuna soo celi iskuulka ilmahaagu dhigto. Ama, waxaad email ahaan ugu soo diri kartaa Dr. Laura Stiver Walsh adigoo ku soo hagaajinaya laura.stiver-walsh@mnps.org soona raacinaya magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada, magaca iskuulka, iyo fasalka uu ku jiro.

☐ Calaamadinta sanduuqan, waxay ku tusaysaa **inaan ilmahaygu** ka qaybqaadan karin Xog-ururimaha Jawiga Iskuullada MNPS.

☐ Calaamadinta sanduuqan, waxay ku tusaysaa **inaan ilmahaygu** ka qaybqaadan karin Xog-ururimaha Badhaadhaha iyo Xaafada MNPS.

Fadlan ogsoonow keliya waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomkan oo aad soo dirtid haddii aadan ilmahaaga u ogolayn inuu ka qaybgalo xog-ururimaha kor ku xusan.

Magaca Ardayga oo sadexan: _____

Magaca Iskuulka: _____

Taariikhda Dhalashada Ardayga (Bisha/Maalinta/Sanadka): _____ /_____ /_____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

Foomkan wuxuu khuseeyaa xog-ururimaha khaaska ah ee MNPS qaado ee kor ku xusan sanad dugsiyeedka 2020-2021 oo keliya. Cilmi-baareyaasha iyo dadka qiimeeya barnaamijka ee ka socda gudoonka ama cid kale ka socda waa inay dalbadaan oggolaansho kale haddii ay samaynayaa xog-ururin kale oo iskuulka ama gudoonku ansixiyo.

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

DOOR-BIDIDA TANAASULKA

SAXEEX BAYAANADA SOO SOCDA HADDII AADAN RABIN IN ILMAHAAGU FURSAD U HELO ADEEGA.

Haddii aad dooratid mid ka mida Door-bidida Tanaasulka, ku soo celi foomka aad saxeexday iskuulka ilmahaaga.

KA TANAASULKA TIGNOOLOJIGA

Saxeex haddii AADAN rabin inaad ilmahaaga u ogolaatid inuu galo internetka gudoonka waxbarashada.

Waan akhriyey Shuruucda Munaasibka ah Adeegsiga Tiknoolijiga MNPS (eeg *www.mnps.org/handbook-policies-and-procedures*). Waan ogahay in internetku yahay khad ku xira mareegaha kumbiyuutarka caalamka iyo in MNPS aysan maamulin waxyaabaha laga heli karo goobaha internet-ka lagalo ama meelaha loo mari karo goobahan internetka laga galo. Waan ogahay in MNPS ay ku dadaali doonto inay kala shaandhayso waxyaabaha ardaydu ka heli karaan goobaha MNPS, hadana dadaalka kala shaandhayntu suurtogal ahayn inuu difaaco waxyaabaha aan haboonayn. Sidaa daraadeed ma ogoli in Ilmahaygu galo Internetka gudoonka waxbarashada. **MNPS igama haysato oggolaansho** ay u ogolaato in ilmahaygu galo internetka. Haddii aadan soo buuxin oo saxiixin arjiga ka tanaasulka tiknoolojiga waxay ka dhigan tahay inaad u fasaxday in ilmahaagu galo internetka gudoonka waxbarashada.

Saxeexa Ardayga _____ **Taariikhda** _____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

KA TANAASULKA LAPTOP/AALADA

Keliya saxeex haddii AADAN rabin inaad ilmahaaga u oggolaatid inuu helo laptop ama aalada la mid ah si ugu adeegsadaan markay iskuulka joogaan iyo markaysan jooginba fursadaha waxbarashada ee fasalka ka baxsan iyo kuwa elektarooniga ah.

Waxaan akhriyey shuruucda u degan adeegsiga Laptop/Aalada MNPS ee Waxbarashada Fasalka ka baxsan ama elektarooniga ah (hoos ka eeg faahfaahinta). MNPS waxaa dhici karta inay bixiso laptop ama aalad la mid ah oo loogu talagalay fursadaha waxbarashada elektarooniga ah marka iskuulka la joogo iyo marka aan la jooginba. Laptopkan ama aaladaha kale ee la midka ah waxaa loo adeegsan doonaa khad kala shaandheeya oo ay bixiso MNPS, sida ku cad Shuruucda Adeegsiga La-aqabli karo. Sidaa daraadeed, waxaan xaddidayaa in ilmahaygu galo aalad loogu talagalay waxbarashada iskuulka ka baxsan iyo waxbarashada online-ka. **MNPS igama haysato oggolaansho** ay ilmahayga ku siiso laptop ama aalad la mid ah. Haddii aadan soo buuxin oo soo saxeexin arjiga ka tanaasulka laptop/aalada waxay ka dhigan tahay inaad u fasaxday in ilmahaaga la siiyo aaladaha loogu talagalay waxbarashada marka iskuulka la joogo iyo marka aan la jooginba.

SHURUUCDA U DEGAN ADEEGSIGA LAPTOP/AALADAHA KALE EE WAXBARASHADA (Sharaxaad dhammaystiran)

Ardayda MNPS waxaa dhici karta in la siiyo laptop ama aalad la mid ah oo loogu talagalay fursadaha waxbarashada elektarooniga ah marka iskuulka la joogo iyo marka aan la jooginba. Waalid walba oo jecel inuu ka mamnuuco ilmihiisa in la siiyo laptop ama aalado la mid ah waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan oo saxeexaan foomka Katanaasulka Laptop/Aaladah oo ku soo celiyaan iskuulka ilmahoodu dhigto.

Haddii aadan soo buuxin oo soo saxeexin arjiga ka tanaasulka laptop/aalada waxay ka dhigan tahay inaad u fasaxday in ilmahaaga la siiyo aaladaha loogu talagalay waxbarashada marka iskuulka la joogo iyo marka aan la jooginba.

1. MNPS ayaa iska leh shatiga qalabka mar walba, haddii aan si kale loo wareejin. Ardayga, waalidka ama masuulka (“anagu”) shati uma haysano ammaanka qalabka ama ma damci karno inaan lahaano ama inaan software ku shubno. Qalabka waxaa ku jiri kara waxyaabaha soo socda: A) laptop iyo B) fiilada dabka (power adapter).
2. Anaga masuuliyadi naga saaran tahay miisaaniyada wuxuu luma, la xado, ama waxyeelada soo gaarto aaladaha. Masuuliyadani kama badan karto $400.00.

3. Ardayga loo qoondeeyey ayaa haysanaya qalabka inta ka hartay sanad dugsiyeedka waana inuu soo celiyo inta ka horraysa 1da Juun, 2021.

4. Haddii waxyeelo soo gaarto aalada, waanu soo celin doonaa aalada. Iskuma deyi doono inaan dayac tirno aalada ama toos ulama xiriirno doono xarumaha kale ee adeega dayactirka kumbiyuutarada.

5. Haddii ay dhacdo inaan ku shubno barnaamij ama wax ka bedelo aalada, taasoo kala-dhantaasha shaqada aalada, anaga ayaa masuuliyadi naga saarantahay inaan lacagta magdhawga gudoonka waxbarashada u celino.

6. Haddii aaladu lunto, la xado, waxyeelo soo gaarto anaga ayaa masuuliyadi naga saaran tahay inaan sida ugu dhakhsaha badan u wargelino hawladeenada maktabada, macallinka, maamulaha ama maamule ku xigeenka.

7. Marka maamulka ama macallinku aalada ama fiilada koranta codsado waa loo geyn doonaa.

8. Haddii aalada aan lagu soo celin iskuulka marka macallinka ama iskuulku codsado ama marka diiwaangelintu dhammaato sababtu waxay doonto ha noqotee, waxaanu aqbalay inaan 30 beri gudahood ku bixino lacagta magdhawga aalada. Waxaa intaas dheer, waxaan fahamsanahay oo aan aqbalay in MNPS ay dacwad u gudbin karto booliska hantida la xado haddii aanu u guuldaraysano inaan soo celino ama bixino 45 beri gudahood lacagta magdhawga aalada iyo waxyaabaha la xiriira.

9. Dhammaan goobaha loo adeegsado waxbarashada hawlwadeenada ayaa qiimeeya inay ku haboon yihiin. Waalidiintu waa inay ogaadaan in marka aaladaha MNPS lagu xiro internet-ka guryahooda in loo dejiyey nidaam kala shaandheeya goobaha ardaydu booqan karto. Waalidiinta waxaa looga baahan yahay inay ilmahooda kala hadlaan ahmiyada ay leedahay ammaanka, masuuliyada iyo xushmada markay ku jiraan online-ka.

10. Dadka adeegsanaya ayaa masuuliyadi ka saaran tahay ammaanka iyo ilaalinta xogta ku jirta qalabka MNPS. Markaa la adeegsanyo tiknoolojiga MNPS, micnaheedu waa in ardaydu sii wado adeegsiga loo ansixiyey aaladaha elektrooniga MNPS (*www.mnps.org/digitaltools*) oo keliya, sidoo kale waa inay u hoggansamaan shuruucda loo dejiyey aalad walba oo loogu talagalay in loo adeegsado koontooyinka ardayga. Haddii ardaydu doortaan inay adeegsadaan aaladaha elektarooniga ama ay galaan adeegyoda online ah taasoo aan qayb ka ahayn liiska MNPS ansixisay, MNPS masuuliyadi kama saarna dhowritaanka arimaha dahsoon ama tabashooyinka amniga ee laga yaabo inay soo if baxaan.

11. MNPS waxay awood u leedahay inay la socdaan adeegsiga aaladaha MNPS si loo xaqiijiyo raacitaanka shuruucda MNPS. Waan fahamsanahay taas, sababtoo ah MNPS waxay u baahan tahay inay la socdaan aaladaha gudoonka, marka la adeegsanayo tiknoolojiga MNPS, waxaa jira waxyaabo xaddidan oo ku saabsan dhowritaanka xogta oo lanaga filayo. Waxaan fahamsanahay in ardaydu yihiin dadka keliya ee MNPS u ansixisay adeegsiga aaladaha elektarooniga ah si looga ilaaliyo in sharcidaro loogu galo xogta ardayga. Waxaa intaas dheer, waxaanu ka warqabnaa in aalada si filan waa ah loo uruurin karo, loo baari karo, sidoo kalena loo fitishi karo.

12. Aalada waa inuu adeegsado keliya ardayga loo qoondeeyey. Waalidiinta/masuulka waxaa keliya ee laga yaabo inay u adeegsadaan aalada waa iyadoo ujeedadu tahay inay ubadkooda waxbarashada ku caawiyaan.

13. MNPS waxay heli doonaan oggolaanshaha dadka ka qaybgelaya kahor inta aan la qaadin sawirka, la duubin cajelada, ama fiidiyowga.

14. Mar walba Shuruucda Adeegsiga La-aqbali karo iyo Shuruucda Tiknoolojiga MNPS waxaa laga heli karaa buuga ardayga-waalidka waxayna khuseeyaan.

Magaca Ardayga oo sadexan: _____

Magaca Iskuulka: _____

Magaca Waalidka/Masuulka oo sadexan: _____

Cinwaanka: _____ Apt./Unit: _____

Degmada: _____ Gobalka: _____ Zip: _____

Teleefan: _____ Email: _____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

KA TANAASULKA ADEEGYADA ARIMAHA BULSHADA ISKUULKA

Saxeex haddii AADAN rabin inaad ilmahaaga u ogolaatid inuu helo adeegyada arimaha bulshada iskuulka.

Waxaan jecelahay inaan ka reebo ilmahayga adeegyada arimaha bulshada iskuulka (eeg *www.mnps.org/handbook-policies-and-procedures*). Ilmahaygu ma awoodi doonno inuu helo adeegyada arimaha bulshada iskuulka. **MNPS igama haysato oggolaansho** ay ilmahaygu ugu fidiso adeegyada arimaha bulshada iskuulka. Haddii aadan soo buuxin oo saxiixin arjiga Katanaasulka Adeegyada Arimaha Bulshada Iskuulka waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu fasax u haysto inuu helo adeegyada arimaha bulshada iskuulka.

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____

METRO NASHVILLE PUBLIC SCHOOLS

Fadlan u saxeex hal foom ilmo walba oo ka mid ah qoyskaaga oo dhigta Iskuullada Dawladda Degmada Nashville (MNPS), kuna soo celi foomka iskuulka ilmo kastaa dhigto.

FOOMKA OGOLAANSHAHA

Faahfaahin kale oo ku saabsan shuruucda la xiriira oggolaanshahan, eeg *www.mnps.org/handbook-policies-and-procedures*.

Waxaan oggolaaday ama diiday in ilmahaygu ka qaybqaato qaybaha aan calaamadiyey ee hoos ku qoran:

	HAA	MAYA
WARBAAHINTA*		
1. Waxaan u ogolahay MNPS inay maamuuska ilmahayga bulshada u soo bandhigi karaan iyagoo adeegsanaya warbaahinta.		
2. MNPS waxay oggolaansho u haystaan inay ilmahayga xog-waraysi la yeeshaan, sawiraan, ama fiidiyow ka duubaan si loogu adeegsado daabacaada, internetka, iyo qaybaha kala duwan ee warbaahinta.		
3. MNPS waxay oggolaansho u haystaan inay u ogolaato in warbaahinta ka baxsan MNPS ilmahayga xog-waraysi la yeeshaan, sawiraan, ama fiidiyow ka duubaan.		
**Haddii MNPS aysan helin foomkan oggolaanshaha oo meelahii la rabey aan la soo calaamadin, gudoonku wuxuu u qaadanayaa in la bixiyey oggolaanshaha koowaad iyo labaad ee kor ku xusan iyo inaan la oggolaan ka sadexaad oo sawirada, ama fiidiyoowga lagu duubo wararka ama warbaahinta ka baxsan MNPS.*		
BAADHITAANADA CAAFIMAADKA		
Ilmahaygu wuxuu oggolaansho u haystaa inuu ka qayb galo baaritaanka maqalka, araga, dhererka, miisaanka, iyo dhiig karka.		

Fadlan qor:

Magaca Ardayga oo sadexan: _____

Magaca Iskuulka: _____

Magaca Waalidka/Masuulka oo sadexan: _____

Cinwaanka: _____ Apt./Unit: _____

Degmada: _____ Gobalka: _____ Zip: _____

Teleefan: _____ Email: _____

Saxeexa Waalidka ama Masuulka _____ **Taariikhda** _____